



Abaalmarinta iyo sharfida: La taliyaha oo lagu sharfay shaqada ay ka hayso Dugsiga Sare ee Franklin

Raquel Laiz waxay haysaa shaqo cusub oo ay ka hayso Dugsiyada Dadweynaha Portland sanad dugsiyeedkani, laakiin waxaa lagu sharfay shaqadeeda boos hore oo ay ka haysay degmada. Laiz ka mid ahayd sagaal la taliye oo kala socday guud ahaan dalka oo si ay ugu guuleystaan [Abaalmarinta La taliyayaasha Wax ka beddela Nolosha.](#)

Abaalmarintan waxaa bixiyay Kulliyadaha Badbaadiya Nolosha ‘Colleges That Save Lives’ oo ah urur “loo qoondeeyay horumarinta iyo taageerida nidaamka raadinta kulliyadda ardayda muhiimada siinaysa.” Laiz waxaa lagu sharfay shaqadeeda ay ka hayso Dugsiga Sare ee Franklin, halkaasi oo ay ka soo noqotay la taliye muddo 13 sanadood ah, iyada oo sideedii sano ee u dambeysay ahayd la taliyaha kulliyada iyo xirfadda.

“Nidaamkeeda shakhsii ahaaneed, firfircoonideeda ayaa isbeddel xoogan u keenay nolosha ardayda,” ayaa ku dhawaaqida CTSL lagu sheegay.

Laiz waxay u wareegtay shaqo cusub oo ka tirsan xafiiska dhexe iyada oo ah falanqeeyaha hawlaха dhanka ganacsiga ee waaxda Kulliyadda Diyaar u ahaanshaha Shaqo. Doorkeeda cusub, Laiz waxay taageertaa isla markaana dejisaa barnaamijyo si ay uga caawiso ardayda guud ahaan degmadu in ay u diyaar garoobaan kulliyadda iyo xirfadaha.

Jilaha Madison oo taariikh dhigay: Eli Rose-White wuxuu noqday arday ugu horreeyay ee ka tirsan Dugsiga Sare ee Madison oo in ka badan 20 sano kaalinta kama dambeysta ah ka gala Tartanka Jilida Gobolka ee Oregon Thespian oo horraantii bishan lagu qabtay Dugsiga Sare ee Liberty oo ku yaala Hillsboro.

Rose-White, oo ah arday sanadka labaad dhigta ayay u riyaaqueen kooxda wax kala saaraysay ‘judges’ oo ka koobnayd saddexda taasi oo ahayd qaybta jilitaanka kali-kalida ah ee heerka bilowga ah si uu helo magacaabista u soo bixida kaalinta kama dambeysta ah, taasi oo u keentay isaga in uu u soo baxo ciyaarahaa dheeraad ah ‘berth’ ee tartanka qaranka ee Juun ka dhacaya Lincoln, Nebraska. Macallimada masraxa ee Zena ayaa sheegtay in guusha xirfadeed ay gaar ahaan hayd mid loo riyaaqay sababta oo ah waxay timiday iyada oo la tartamaysay arday hesha tababar gaar ah, taasi oo ah wax aanay Rose-White haysan.

Sidoo kale ka tirsan PPS, Jaime Fields oo ka socotay Grant ayaa loo magacaabay u soo baxaha bandhiga taasi oo ahayd qaybta jilitaanka kali-kalida ah ee qaybta dadka khibrada leh. Taasi waxay u keentay in ay boos ka hesho Bandhiga Xulashada Gobolka oo ka dhacaya Salem bisha Abriil.

Kartooniistaha Lincoln oo la geliyay tartanka qaranka: Laba kartooniistaha dhanka tafatirka oo ka socda Dugsiga Sare ee Lincoln High School ayaa la geliyay [Tartanka Kartoonka Tafatirka Ardayga ee New York Times.](#)

Ardayada sanadkii hore dhigata ee Hadley ayaa kaalinta labaad gashay taasi oo ahayd ta ay ku gashay tartanka ee magaceedu ahaa Saladhku wuu ka wax dilis badan yahay hubka ["Lettuce more deadly than guns."](#) Ardayada sanadka labaad dhigata ee Jade Hall ayaa heshay xulashada magacaabista sharafta leh taasi oo ahayd [qaybleeda aan magaca lahayn oo ka hadlaysay toogashooyinka dugsiga.](#)